

Ilmaaga waxaa laga yaabaa inuu soo gaadhay:

Jadeeco	Jadeecadu waa cudur halis ah oo finan wata, oo looga hortagi karo tallaal.
----------------	--

Haddii aad isleedahay ilmaaga wuxuu qabaa jadeeco, u sheeg xanaanada caruurta ama wac dugsiga.

Ilmaaga ku hay guriga yaanu tegin xanaanada caruurta iyo iskuulka ilaa 4 maalmood kaddib marka finanku bilaabmaan.

Ilmo jadeeco qabaa waa in aanu ka qayb qaadan wax wax-qabada ah mudadaa dhexdeeda.

Haddii jadeeco lagu arko xanaanda ama dugsiga ilmaaga, Waaxda caafimaadka dadweynahu waa inay war geliyaan carruurta aan tallaalinayn iyo shaqaalaha inta ay u baahan doonaan inay guryahooda joogaan.

Wixii macluumaad dheeraad ah, wac Hennepin County HSPHD Faafa ee 612-543-5230 ama wac Waaxda caafimaadka ee xaafaddaada.

Astaamaha

Ilmaaga waxaa laga yaabaa in uu leeyahay qandho sare, indhaha oo ilmeeya, sanka oo dareera, iyo qufac. Finan ayaa ka soo baxa maalinta saddexaad ilaa maalinta toddobaad ee xanuunka. Furuurucu wuxuu u ekaan karaa guduud. Wuxuu sida caadiga ah ka bilaabmaa wajiga (halka timaha iska galaan) ka dibna hoos ugu fidaa jirka, gacmaha iyo lugaha. Finan ayaa ugu danbeyn qariya jirka oo dhan. Finanku waxay jiri karaan muddo 7 maalmood ah.

Haddii ilmahaaagu uu ku dhacay cudurkani, waxaa dhici karta in calaamaduhu ay ka soo muuqdaan 7 ilaa 21 maal mood.

Fidin

- Qufac iyo hidhiso.
- Neefsashada fayras jadeecadaa oo hawda ka qaadatid.
- Taabatid meelo wasakhaysan.

Mudada fidida

4 maalmood ka hor ilaa 4 maalmood ka dib marka finan ku bilaaban.

Wac daryeelaha caafimaadkaaga

Haddii qof gurigaaga ka mid ah:

- Jadeecadu soo gaadhay aanse jadeecada horay ugu dhicin horayna looga tallaalin.
- Yeesho calaamadaha hargabka sida qandho iyo/ama finan. Ha tegin xarun caafimaad adiga oo marka hore sii wicin kiliinigaaga. Ilmaaga waxa lagu hayn doona meel gooniya ah si looga hortago faafidda cudurku. Imtixaan shaybaar ah ayaa loo sameeyn.

Ka hortagga

- Minnesota, dhammaan carruurta 15 bilood jira ama ka weyn tagana xanaanada caruurta ama iskuulka waa in laga tallaalo jadeecada ama sharci ahaan looga dhaafay. Qiyaas labo daawo ama ka kaaftoon sharci ah baa looga baahan yahay xanaanada iyo diiwaangelinta fasalka toddobaad.
- Dabool sanka iyo afka marka aad qufacaysid iyo hindhisaysid. Isticmaal waraaq ama marada gacanta shaadhka, tuurna qashinka warqadaad isticmaashay.
- Gacmahaaga dhaq marka aad taabato warqado lagu tirtiray dheecaan ka yimid sanka ama afka. Ka caawi ilmahaaga gacmo dhaqista hadduu u baahdo.
- Nadiifi wixii uu taabto dheecaan ka yimi sanka ama afka. Isticmaal waxyaabaha dila jeermiska.